

Adeegyada lacag bixinta

Ku billaw kaar- iyo dijitaal lacag ku bixin



Kaar bangi

Kaar bangi waxaa ku siinaya bangigi aad akoon ka furatid.

Kaarka bangiga waxaad lacag ku bixin kartaa halkan Swiidhan gudeheeda iyo dibaddaba, waxaad uga adeegan kartaa dukaamanka iyo intarneetka labadaba, waxaadna kaash ugala bixi kartaa, kuna shubi kartaa Bankomat ama qaar dukaamanka ka mid ah.

Kaarka bangiga ee leh calaamadda Wi-Fi waxyabo yar-yar ayaad ku iibsan kartaa adigoo kaarka "dhiiq ku siinaya", saaraya kaar-akhriyaha.



Noocyoo kala duduwan oo kaarar ah

Kaar bangi, kaar lacagta lagu soo dallacanayo

Lacagta toos ayaa akoonka looga jaranyaa.

Kaar lacag bixin iyo kaar amaaheed

Gadaal dambe ayaa lacagta laga bixinayaa. Soo hoos gelayaa xeerarka macaamiisha.

Waxay taasi ka dhigantahay in marka aad kaarka deynsashada ku adeeganeysid aad la xiriiri kartid iibiyaha iyo deyn bixiyaha labadaba haddii aad dood ka qabtid waxa aad iibsatay.

Kaararka kala duduwan isku barbar dhig:

www.konsumenternas.se


Maskaxda ku hay

- Kaarka si ootomaatik ah ayaa loo xirayaa haddii aad seddax jeer kood qaldan gelisid.
- Xir kaarka lana xiriir bangigaaga haddii uu jabo kaarku, uu kaa lumo ama uu mashiin kaa liqo.
- Ilaasho koodkaaga, abidkaana macluumaadka shakhsiga ah ama koodadka ha iska siinnin qof.

Kaar lacagta kula bixi meesha lacagta lagu bixiyo

- Kaarka geli iyadoo ay birtu hoos xigto
- Lacagta hubi inta ay tahay
- Nambarrada geli, 4 nambar
- Batoonka cagaaran riix si aad u oggolaatid
- Kaarkaaga qaado
- Rasiidkaaga qaado

Wey dhamaatay ✓





LÄNSSTYRELSEN
DALARNAS LÄN

Ma u baahantahay lacag kaash ah?

Waxaad lacag kala bixi kartaa

dukaan iyo mashiin ootomaatik ah oo lacag lagala baxo

labadaba



Waxaa lacag kala bixi kartaa kuna shubi kartaa Bankomat


- Lacag waad kala bixi kartaa, waadna ku shubi kartaa Bankomat-yada qaarkood.
- Waxaa jirta fursad lagu kala dooran karo luqado fara badan.
- Adiga naftirkaaga ayaa kood ka beddelan kara Bankomat-yada ootomaatigga ah.



Halkan waxaad luqado fara badan ugu akhrisan kartaa
wax dheeraad ah oo ku aaddan sida aad
sameyneysid:

Bankomat.se, Lacag la bax

Bangi intarneet iyo BankID



Bangiga intarneetka

Bangiga intarneetka waxaad ka heli kartaa:

- Nambarka akoonkaaga
- Waxaad ka koontarooli kartaa lacagaha galay iyo kuwa ka baxay
- Faatuurooyinka ayaad giro-ga ku dhiibi kartaa
- Akooman kale ayaad lacag uga diri kartaa
- Adeegyo kale duwan ayaad ka maareyn kartaa, tusaale ahaan BankID iyo Swish.



Waxyaabaha lagu galo bangiga intarneetka

Si aad u gashid bangiga intarneetka waxaad isticmaali kartaa:

- Doosaha yar ee ammaanka
- BankID-ga taleefanka gacanta
- BankID kaar ah
- BankID feyl ah



Waa maxay BankID?


- BankID waa aqoonsi elekteroonig ah oo aad isticmaali kartid marka hey'ad dowlaadeed ama bangi aad intarneetka isugu sheegeysid qofka aad tihid.
- Waqtiga hadda ah BankID waa aqoonsiga elekterooningga ah ee Swiidhan ugu badan ee la barbar dhigi karo aqoonsiyada kale sida baasaboor iyo leysin gaari.
- BankID waxaa soo saara bangiyada.






Ku gal BankID-ga taleefanka gacanta

1. Meesha hore ku qor nambarradaada aqoonsiga
2. Dooro ku gal BankID-ga taleefanka gacanta *Taleefankaaga gacanta ka fur BankID*
3. Qor koodkaaga sirta ah
4. Riix Legitimera



Baaqyo xagga ammaanka la xiriira

- ✓ Abidkaa taleefan ama e-mail ha ku dhiibin macluumaadka shakhsiga ah!
- ✓ Si suga uga bax, ka dib marka aad gashid bangigaaga intarneetka ama bog kale oo intarneet.



Qaansheegadyada bixi



LÄNSSTYRELSEN
DALARNAS LÄN

Faatuuro

	Företagsnamn																																									
Fakturamodell	15350																																									
OCR-nummer	11100067349401	Förnamn Efternamn																																								
Fakturadatum	2019-01-01	Gatuadress																																								
Kundnummer	341134111	Postnummer Ort																																								
Summa att betala 1 200 kronor																																										
Oss tillhanda	1 februari 2018																																									
Om du använder annat sätt att betala än med inbetalningskortet är det viktigt att du uppger ditt OCR																																										
Företagsnamn AB 116 00 Stockholm Företaget.se	Telefon 020-222 222 Plusgiro 94 90 01-1 Bankgiro 5572-4949	Organisationsnummer 1000100011 Momsreg.nummer 3334445 Godkänd för F-skatt																																								
<table border="0"><tr><td colspan="2">Bankgirot</td><td>INBETALNING/GIRERING</td><td>AVI</td></tr><tr><td colspan="2">Med denna avi kan du betala på alla bankkontor eller via</td><td>Ifylls av banken</td><td>OCR</td></tr><tr><td>Bankgiro</td><td>Personkonto</td><td></td><td></td></tr><tr><td>Privatgiro</td><td>Balanskonto</td><td></td><td></td></tr><tr><td>Sparbanksgiro</td><td></td><td></td><td></td></tr><tr><td colspan="2">Betalningsanvändare</td><td>Fakturamodell</td><td>65305350</td></tr><tr><td colspan="2">Förnamn Efternamn</td><td>Kundnummer</td><td>341134111</td></tr><tr><td colspan="2">Gatuadress</td><td>Förfallodatum</td><td>2019-02-01</td></tr><tr><td colspan="2">Postnummer Postort</td><td>Till bankgiro nr.</td><td>Betalningsmottagare</td></tr><tr><td colspan="2"></td><td>5572-4949</td><td>Företagsnamn AB</td></tr></table>			Bankgirot		INBETALNING/GIRERING	AVI	Med denna avi kan du betala på alla bankkontor eller via		Ifylls av banken	OCR	Bankgiro	Personkonto			Privatgiro	Balanskonto			Sparbanksgiro				Betalningsanvändare		Fakturamodell	65305350	Förnamn Efternamn		Kundnummer	341134111	Gatuadress		Förfallodatum	2019-02-01	Postnummer Postort		Till bankgiro nr.	Betalningsmottagare			5572-4949	Företagsnamn AB
Bankgirot		INBETALNING/GIRERING	AVI																																							
Med denna avi kan du betala på alla bankkontor eller via		Ifylls av banken	OCR																																							
Bankgiro	Personkonto																																									
Privatgiro	Balanskonto																																									
Sparbanksgiro																																										
Betalningsanvändare		Fakturamodell	65305350																																							
Förnamn Efternamn		Kundnummer	341134111																																							
Gatuadress		Förfallodatum	2019-02-01																																							
Postnummer Postort		Till bankgiro nr.	Betalningsmottagare																																							
		5572-4949	Företagsnamn AB																																							
VAR GOD GÖR INGA ÄNDRINGAR MEDDELANDEN KAN INTE LÄMNAS PÅ AVIN DEN AVLASES MASKINELLT																																										
OCR/REFERENS	Kronor	Ore																																								
11100067349401 #	1 200	00 7 >	5572959#41#																																							

Faatuuro

Bankgirot

Med denna avi kan du betala på alla bankkontor
eller via

- 1 Bankgiro
- Privatgiro
- Sparbanksgiro

Personkonto
Balanskonto

Betalningsanvändare

Förnamn Efternamn
Gatuadress
Postnummer Postort

INBETALNING/GIRERING	AVI
Ifylls av banken	OCR

- 2 Fakturanummer 65305350
- Kundnummer 341134111
- Förfallodatum 2019-02-01

Till bankgironr.	Betalningsmottagare
5572-4949	Företagsnamn AB

VAR GOD GÖR INGA ÄNDRINGAR MEDDELANDEN KAN INTÅ LÄMNAS PÅ AVIN DEN AVLÄSES MASKINELLT

OCR/REFERENS

5 11100067349401 #

Kronor

6 1 200

Öre

00 7 >

7 5572959#41#

1. Nidaamka loo raaco lacag bixinta, bank-ama plusgiro
2. Nambarka faatuurada
3. Taariikhda ay dhaceysa
4. Nambarka bankgiro-ga
5. OCR-ka ama nambarka lacagta lagu bixinayo
6. Lacagta
7. Nambarrada cidda lacagtukku socoto

Taleefan ku bixi qaansheegadka

Ku gal BankID-ga taleefanka gacanta
ama doosaha ammaanka

- Liiska shaashadda tag
- Riix Betala och överföra
- Dooro akoonka lacagta laga jarayo
- Dooro ama ku dar cidda ay lacagtū ku socoto
- Ku qor lacagta la kala gudbinayo
- Taariikhda ku buuxi (haddii aadan wax
ku qorin toos ayaa lacagta loo
jaranayaa)
- Ku qor OCR (haddii nambar OCR
uusan jirin nambarka faatuurada
fariin ahaan ugu qor)
- Riix Lägg till



Taleefan ku bixi qaansheegadka

- Riix Godkänn
- Sug inta BankID-gu uu ka furmayo
- Koodkaaga geli, 6 nambar
- Riix Skriv under

Iminka lacagti qaansheegadka
waa la bixiyay



- Dhag sii klar si aad horay ugu sii socotid arrimo kale ama aad uga baxdid.



Hawlo gaar ahaaneed oo kala duduwan marka lacag la bixinayo



Faatuurooyinka dijitaal ahaan kuugu yimaada waxaad u baahantahay in aad saxiixdid oo keliya, aadna oggolaatid.

Haddii faatuuradu kood QR leedahay waad ku akhrin kartaa macluumaadka faatuurada. Riix calaamadda kaamirada ee sawir koodka ka qaad. Xitaa sadarka ugu hooseeya faatuurada waa lagu akhrin karaa kaamirada.



Calaamad kalandaariye. Riix si aad taariikh u soo qaadatid.

Ku dar lacag loo dire kale



- Riix Till
- Aad Ny mottagare
- Dooro nooca loo diraha
- Ku qor nambarka bankgiro-ga, waxaad kaas ka heleysaa faatuurada
- Riix Hämta mottagarnamn
- Hubi in uu magacu sax yahay
- Oggolaw loo diraha

Wey dhamaatay






LÄNSSTYRELSEN
DALARNAS LÄN




Ku dhiib lacagta app-abka taleefanka
gacanta



- Lacag u kala gudbi dad shacab ah iyo shirkado
- Lacagta toos ayaa akoonka looga jaranyaya
- Qofka lacag wey usoo dhici kartaa isagoon haysan taleefan gacan oo caqli badan
- Bangi kasta isagaa lacagiiisa khidmada go'aaminaya.







Adeegyada lacag bixinta ee dukaamada

Dukaamada qaarkood waxaad, adigoo lacag ka dhiibaya, miiska dushiisa ku bixin kartaa qaansheegadyada, la bixi kartaa, ku shubi kartaa, kuna xawili kartaa lacag.




Adeegyada lacag bixinta ee intarneetka

Waxaa jira adeegyo lacag bixin oo kala duduwan si intarneetka lacag loogu bixiyo. PayPal, Masterpass iyo Klarna waa dhawr tusaale.



Lacag u xawil waddamo kale



**MONEY
FROM SWEDEN**
En tjänst från Konsumentverket

Halkan waxaad isku barbar dhigi kartaa inta kharash ah ee ay ku kaceysa in shirkado kala duwan lacag laga xawisho. Wuxaan sidoo kale arkaysaa inta waqtii ah ee ay qaadaneyso.

Adeeggan waxaa wada Konsumentverket oo aha hey'ad dowladeed.

Kaarar bangi hooray lacagtooda loo bixiyay

Wax ay dooran karaan dalxiisayaasha iyo magangelyodoonku

- Kaarar bangi oo hooray lacagiisa loo bixiyay waxaa la isticmaali karaa si looga adeegto dukaaman oggol kaar lacag ku bixinta iyo intarneetka.
- Waxaa wax looga iibsan karaa dukaamanka maalinlaha ah ama doqoshyada.
- Waxaa jira kaarar horay lacagtooda loo sii bixiyay oo la kala dooran karo. Lacagaha khidmada ah iyo xeerarku waxay ku xiranyihiiin kaarka uu qofku dooranayo.

Ma dooneysaa in aad wax dheeraad ah ka ogaatid
adeegyada bangiyada?

Gal <https://www.konsumenternas.se/ny-i-sverige>

Ma raadineysaa macluumaad luqado fara badan ah?
<https://www.hallakonsument.se/pengar-och-ekonomi/livssituationer/ny-i-sverige/>

Ma dooneysaa in aad wax dheeraad ah ka ogaatid
Swiidhan?

Booqo informationsverige.se

*Tusaalooyinka warbixinta lagu soo qaaday waa adeegyada
ugu badan oo ay dadka badankoodu iminka isticmaalaan
Sviidhan.*



LÄNSSTYRELSEN
DALARNAS LÄN

Macluumaadka xiriirka ee dadka
mas'uulka ka ah shaqada aasaasiga
ah ee adeegyada lacag bixinta ee
gobalkaaga:

Materialet är framtaget av
Länsstyrelsen i Örebro län
Stortorget 22, 701 86 Örebro
010-224 80 00
orebro@lansstyrelsen.se
www.lansstyrelsen.se/orebro